

Fahmida Natiijooyinka Baaritaankaaga Cagaarshowga B*



Baaritaanada dhiigga ee agabka Cagaarshowga B waxaa kamid ah saddex baaritaan. Dhammaan saddexda natiijooyin waa in la ogaadaa si loo xaqiijiyo xaaladaada. Hoos waxaa ku qoran jaantus leh sharraxaadda ugu badan ee natiijooyinka baaritaanka, laakiin natiijooyin aan caadi ahayn ayaa dhici kara.

FADLAN OGOW: jaantuskan looguma talagalin talo caafimaad ahaan. Kala hadal dhakhtarkaaga sharaxaad buuxda oo hel nuqul daabacan oo ah natiijooyinka baaritaankaaga.

HBsAg Sagxada Cagaarshowga B Baaritaanka Antigiinka	anti-HBs (HBsAb) Sagxada Cagaarshowga B Baaritaanka Difaacyada Jirka	anti-HBc (HBcAb) Bartamaha Cagaarshowga B Baaritaanka Difaacyada Jirka	Waxay natiijooyinka ka dhigan yihiin	WAXA AAD U BAAHAN TAHAY INAAD SAMAYSO
—	—	—	Ma tihid mid tallaalan/difaacan <ul style="list-style-type: none"> Ma qabtid cudurka horana ma aadan u qaadin. Waxaad halis ugu jirtaa caabuqa cagaarshowga B. 	Tallaal ayaa loo baahan yahay
—	+	—	Waxaa tahay mid tallaalan/difaacan <ul style="list-style-type: none"> Ma kugu dhicin cudurka. Waxaad u difaacan tahay tallaalka cagaarshowga B awgiisa. 	Wax tallaal ah looma baahna
—	+	+	Waxaad difaac jireed u qaadatay caabuqa dabiiciga ah awgiisa <ul style="list-style-type: none"> Waxaad ka soo kabsatay caabuqa cagaarshowga B hada ka hor. Ma qaadsiiin kartid dadka kale. 	Wax tallaal ah looma baahna <ul style="list-style-type: none"> U sheeg dhammaan dhakhaatiirtaada wax ku saabsan natiijooyinka baaritaanka cagaarshowga B. La hadal dhakhtarkaaga kahor inta aadan qaadan difaaca caburinta sababtoo ah waxay kordhin karaan halista dib u kicinta cagaarshowga B.
+	—	+	Waxad qaday caabuqa <ul style="list-style-type: none"> Waxa dhiigaaga ku jira fayraska cagaarshowga B. Waxaad u gudbin kartaa fayraska cagaarshowga B dadka kale. 	Waxaad u baahan tahay baaritaan dheeraad ah <ul style="list-style-type: none"> Raadso dhakhtar si aad u hesho qiimeyn iyo baaritaan dheeraad ah. U sheeg dhammaan dhakhaatiirtaada wax ku saabsan natiijooyinka baaritaanka cagaarshowga B. Hubi in lammaanahaaga iyo kuwa kula nool la baaro lana tallaalo.
—	—	+	Waxaa laga yaabaa in lagu qaadsiiyo <ul style="list-style-type: none"> Natiijadu ma cadda-caabuqa cagaarshowga B ee hore ama hadda jira. 	Waxaad u baahan tahay baaritaan dheeraad ah <ul style="list-style-type: none"> Raadso dhakhtar si aad u hesho qiimeyn iyo baaritaan dheeraad ah. U sheeg dhammaan dhakhaatiirtaada wax ku saabsan natiijooyinka baaritaanka cagaarshowga B. La hadal dhakhtarkaaga kahor inta aadan qaadan difaaca caburinta sababtoo ah waxay kordhin karaan halista dib u kicinta cagaarshowga B. Hubi in lammaanahaaga iyo kuwa kula nool la baaro lana tallaalo.